



SI DHAMAYSTIRAN U XIRIDA LEENKA BULUUGA

SEBTEEMBAR 22 – OKTOOBAR 4

**Laga bilaabo 10 p.m. maalinta Isniinta,
Sebteembar 22 ilaa iyo Sabtida,
Oktoobar 4:**

Leenka Buluugga ah ee METRO oo dhan lama heli doono sababtoo ah mashruuca casriyaynta wadada tareenka & Calaamadaha awgood. Adeegga baska beddelaada ah ayaa ka shaqayn doona dhammaan leenka Buluuga ah.

OGSOONNOOW: U adeeggida dhammaan boosteejooyinka bartamaha magaalada Leemanka Buluugga iyo kan Cagaaran ah labadaba lama heli doono. Basaska beddelka ayaa u adeegi doona dhammaan boosteejooyinka ku yaalo bartamaha magaalada ee ay saamaysay.

Ka hel goobaha baskaaga beddelka ah dhammaan boosteejooyinka barta metrotransit.org/closure.

Wajiga 1aad ee Mashruuca Beddelaada Wadada Tareenka iyo Calaamadaha

Wajiga 1aad ee Mashruuca Wadada Tareenka iyo Calaamadaha wuxuu ka dhigi doonaa Leenka Buluugga inuu muddo dheer sii jiro, gaar ahaan biraha iyo daara-damiyaha u dhow Cedar-Riverside.

Marka shaqada la dhammeeyo, tareenku wuxuu si habsami leh ugu socon doonaa jidka cusub. Waxay noqon doontaa mid mudan in la sugo!

Shaqada la dhamaystirayo inta lagu jiro marxaladan waxaa ka mid ah:

- Beddelida biraha duugoobay ee ku jira wadada oo dhan
- Beddelka daara-damiyaha tareenka ee aagga Cedar-Riverside

La socio Digniinaha Rakaabka inta lagu jiro mashruuca dayactirka Wadada Tareenka iyo Calaamadaha!

Ha la kulmin adigoona wax war ah ka haynin, maanta iska diiwaan geli barta metrotransit.org/alerts si aad u hesho wixii soo kordha oo dadka loogu soo diro iimaylka ama fariin qoraaleed ahaan!

Ama nagala socio X qormada "digniinada-kaliya" aan ka soo dhigno ciwaanka [@MT_MN_Alerts](https://twitter.com/MT_MN_Alerts), [Facebook.com/MetroTransitMN](https://facebook.com/MetroTransitMN), iyo barta [@metrotransitmnbksky](https://twitter.com/metrotransitmnbksky) si aad ula socoto xogihii ugu danbeeyay.

Wixii kaalmo dheeraad ah, ka wac Transit Information Center lambarka 612-373-3333.

Ka hel wax kasta oo aad u baahan tahay barta metrotransit.org/closure.



RENEW THE BLUE

Mashruuca casriyaynta wadada tareenka iyo calaamadaha waa qayb ka mid ah Cusbooneysii Buluugga, cusboonaysiinta sannadaha badan ee Leenka Buluugga ah ee METRO.



Booqo barta metrotransit.org/renew-the-blue si aad isugu diiwaan geliso warside ku saabsan tan iyo dhammaan Cusbooneysii mashaariicda Buluugga ah.



T METRO
Blue Line

Adiga ayaan halkan kuu joognaa!

Arag dhammaan ikhtiyaaradaada aad ku tagi karto meesha aad u baahan tahay inaad tagto inta lagu jiro xiritaanka leenka Taraaga iyo Calaamada jidka Buluuga ah ee Metro.



Adeegga baska ee beddelaya tareenka

Adeegga baska ee beddelaada ah ayaa diyaar u ah dhammaan boosteejooyinka Leenka Buluuga ah wuxuuna raaci doonaa jadwalka tareenka sida xaaladaha taraafikada ay u oggolaadaan.

Ka eeg khariidadda goobaha baska laga raaco boosteejo kasta barta metrotransit.org/closure.



Xilli hore qorsheyso!

- Waqti baska beddelaada ah wuu kala duwanaan karaa safarkuna wuxuu qaadan karaa muddo dheer. **Fadlan u qorsheyso waqti dheeraad ah safarkaaga.**
- Jadwalada baska beddelka ah ayaa laga heli karaa barta metrotransit.org – ka raad raac basaska bedelka NexTrip barta metrotransit.org/nextrip



Bixinta nooligaaga

- Si ka duwan xiritaannadii hore, macaamiisha waxaa looga baahan doonaa inay bixiyaan nooligooda markay raacayaan basaska beddelaada ah.
- Ka soo fuul baska albaabka hore kuna bixi lacagta cadaanka ah mashiinada gaariga ama isticmaal kaarkaada Go-To Card ama mari tigidhka akhriyaha kaarka.
- Ablikeeshinkeena cusub wuxuu kaaga dhigayaa lacag bixinta mid sahlan – wax badan ka ogoow barta metrotransit.org/app.

OGSOONOOW: Adeegga lagu tago dhammaan boosteejooyinka bartamaha magaalada Leemanka Buluugga iyo kuwa Cagaaran labadaba lama heli doono. Basaska beddelka ayaa u adeegi doona dhammaan boosteejooyinka ku yaalo bartamaha magaalada ee ay saamaysay.



Baaskiil Ku wado

Waxaad u dhaqaaqi kartaa meel kasta oo kamid ah goobaha xidhan, ama kaliya inta u dhaxaysa boosteejooyinka haddii loo baahdo.

Dhammaan basaska beddelka ahi waxay leeyihiin meelo si bilaash ah baaskiilada loo gashto.



Ku xidhida / Jidadka kale ee la isticmaali karo

Metro Transit waxa ay leedahay waddooyin bas oo kala duwan oo ku xidha ama ku siinaya habab kale oo aad ku gaadho meeshaad u socoto. Waxaan kugula talineynaa inaad isticmaasho Qorsheeyaheena Safarka si aad u sahamiso fursadahaaga gaadiidka ama kula xiriirida Transit Information qaab wada sheekaysi ah si aad u hesho caawinaad adigoo isticmaalaya badhanka "Caawimo Ma u Baahan tahay?" oo ku yaalo qaybta hoose ee midigta websaydka, iyada oo loo marayo qoraalka 612-444-1161, ama telefoonka 612-373-3333.

Halkan waxaa ku qoran liiska boosteejooyinka Leenka Buluugga ah ee leh waddooyinka baska ee taga bartamaha magaalada Minneapolis ama Mall of America.

Boostejada Gaadiidka ee Mall of America

- Wuxuu isku xidhaa jidadka: METRO D iyo Leemanka Casaanka ah, 54, 442, 444, 495, 515, 538, 539, 540, iyo 542
- Jidka kale ee lagu tagayo bartamaha magaalada Mpls: Leenka METRO D
- Jidka kale ee lagu tagayo Terminaal 1aad ee Garoonka Diyaarada iyo bartamaha magaalada St. Paul: 54

30th Ave.

- Waxay isku xidhaa jidka Mall of America and St. Paul: 54

American Blvd.

- Waxay isku xidhaa jidka Mall of America and St. Paul: 54

Garoonka Diyaarada - Terminaal 1

- Wuxuu isku xidhaa jidka Mall of America iyo St. Paul: 54

VA Medical Center

- Wuxuu isku xidhaa jidadka: 22 iyo 440
- Jidka kale ee lagu tago bartamaha magaalada Mpls.: 22

46th St.

- Wuxuu isku xidhaa: Leenka A ee METRO, 7, 9, 46, 74, 436, iyo 446
- Jidadka kale ee lagu tagayo bartamaha magaalada Mpls.: 7 iyo 9

38th St.

- Wuxuu isku xidhaa jidadka: 14 iyo 38
- Jidadka kale ee lagu tagayo bartamaha magaalada Mpls.: 14 iyo 22

Lake St./Bartamaha magaalada

- Wuxuu isku xidhaa jidadka: 27 iyo Leenka B ee METRO B

Franklin Ave.

- Wuxuu isku xidhaa jidadka: 2, 9, 22, iyo 67
- Jidadka kale ee lagu tago bartamaha magaalada Mpls.: 9 iyo 22

U.S. Bank Stadium

- Wuxuu ku xidhaa: Leenka Cagaaran ee METRO

Govt. Plaza

- Jidka kale ee lagu tagayo Mall of America: Leenka D ee METRO

Nicollet Mall

- Jidka kale ee lagu tagi karo Mall of America: Leenka D ee METRO

Warehouse District/Hennepin Ave.

- Jidka kale ee lagu tagayo Mall of America: Leenka D ee METRO